Magaalada Helsinki
Xafiiska arrimaha bulshada

Ogolaanshaha lacagta kaalmada nolosha Sababaheeda 2008

Lacagta kaalmada nolosha waxa loogu tala galay inay tahay kaalmo ku meelgaar ah, taasoo lagu daboolayo baahida nolosha ee lagama maar maanka ah ee qofka ama qoyska, kuwaasoo aan dhaqaalo ku filan ka heleynin shaqadooda, shirkadooda, dakhliga kale ee soo galaa ama dhaqaalahooda kale uusan ku filneyn. Lacagta kaalmada nolosha si codsiqoraal ah ayaa loo dalbadaa. Kahor inta aan la ogolaanin lacagta kaalmada nolosh waxaa la xaqiijinayaa, in macaamiilka leeyahay sharuudo uu ku heli karo lacagaha kale, qofkasta waxaa waajib ku ah in uu ka taxadero sidii uu isu masruufi lahaa hadba sida uu u awoodo. Shaqaalaha arimaha bulshada ama shaqaalaha hagayaalka ah ee arimaha bulshada waxa ay caawinaayaan sidii loogu heli lahaa xal dhibaatada lacagta kaalmada nolosha. Waaxa uu shaqaalaha arimaha bulshada xaqiijinayaa macaamiilkooda shaqo la'aanta ah waxa ka horjooga in lashaqogeliyo waxaa kaloo shaqaalaha arimaha bulshada u raadinaayaa xal lagu horumarinaayo shaqaaleenta.

Sidee loo xisaabiyaa cadadka kaalmada nolosha?

Marka hore waa laysku xisaabiyaa gabi ahaan dalbadaha / qoyska daqliga soogalo oo ay isticmaali karaan iyo hantidooda. marka laysu geeyo dakhliyada waxa ka soo baxa ayaa laga jaraa dalbadaha/ qoyska qarashkooda loogu tala galay inuu ku baxo cuntada ama raashiinka iyo waxyaabaha kale ee loogu tala galay inay noqdaan kharash aasaasi ah ku baxo (looguna magacsaabo lacagta kaalmada nolosha qeybteeda asalka ah), iyo waxyaabaha kale ee taageerooyinka kale ee inay baxaan uu qofku xaqa u leeyahay. Haddii dakhliga uu ka yar yahay kharashka la ogol yahay inuu baxo, qofkaas wuxuu xaq u leeyahay inuu helo lacagta kaalmada nolosha.

Qeybta aasaasiga ah ee lacagta kaalmada nolosha waxaa saameeya tirada qoyska uu ka kooban yahay iyo caruurta da'dooda

Lacagta kaalmada nolosha qeybaheeda asalka ah laga bilaabo 1.1.2008

		Qaybta asalka ah oo buuxda	Qaybta asalka ah oo la dhimay	
		euro/bishii	20 % euro/bishii	40 % euro/bishii
Qofka kaliga degan iyo Kali xanaaneeyaha		399,10	319,28	239,46
Kuwa kale ee 18 sano U buuxsantay		339,24	271,39	203,54
Qofka ay 18 sano u buuxsantay ee waalidkiis la degan		291,34	233,08	174,81
10 - 17 sano	ilmaha 1aad	279,37		
	ilmaha 2aad	259,42		
	ilmaha 3aad	239,46		
0 - 9 sano	ilmaha 1aad	251,43		
	ilmaha 2aad	231,48		
	ilmaha 3aad	211,52		

Lacagta kaalmada nolosha qeybteeda aasaasiga ah waxa ay ka kooban tahay

Sida loo soocadeeyay cadada lacagta ee kor ku qoran waxaa loogu talagalay qarashka soo socda

- qarashka cuntada ku baxa
- gadashada dharka, dhaqida iyo tolida ama dayactirka dharka
- qarashka timo jarida iyo hagaajintooda
- qarashka ku baxa nadaafada shaqsiga
- daawooyinka farmashiyaha laga gato ee uuna dhakhtarku qorin iyo kharashka yaryar ee daryeelka loogu baahdo iyo daawada dhakhtarku qoro ee ceymiska caafimaadku aanu bixin qarashka tagida rugta caafimaadka ee xubnaha qoyska ka tirsani ay bixiyaan bilkasta marka ugu horeyso
- qarashka basraaca ee Helsinki dhaxdeeda
- qarashka isticmaalka teleefishanka, wargeysyada la dalbado. Iyo qarashka isticmaalka taleefoonka
- qarashka isticmaalka internetka
- qarashka ku baxa waxyaabaha yaryar ee madadaalada ah iyo hiwaayadaha.

Qeybta aasaasiga ah waxaa kaloo dheer oo kaalmada lacagta nolosha qofka loogu ogolaan karaa qarashka ku baxa waxyaabah soo socda

- qarashka macquulka ah ee ku baxa guriga (ijaarka, biyaha, kululaynta guriga, kharashka la siiyo qolada daryeesha guriga uu qofku leeyahay "yhtiövastike", dulsaarka deynka guriga)
- biilka macquulka ah ee korontada, gaaska iyo ceymiska guriga
- qarashka la ogolyahay ee uu qofka bukaanka ah uu bixiyo iyo qarashka ku baxa daawooyinka uu dhakhaatiirta ay u qoraan in cudurada lagu darteelo
- qarashka xannaanada haddii la keeno rasiidka lagu bixiyay
- qarashka ku baxa guuritaanka ee muhiimka ah
- qarashka duugida (aaska qofka marka uu dhinto) iyadoo la siinayo warqad (maksusitoimus) oo uu la tagayo dukaamada hishiiska la leh xafiiska shooshalka
- qarashka muhiimka ah ee ku baxa safarka shaqada iyo qarashaka ku baxa shaqo qabashada.

Sababo laga fekeray darteed waxaan ku ogolaan karnaa dhameystir ama kahortaga lacagta kaalmada nolosha xitaa waxaa lagu ogolaan karaa , sida xaaladaha qaaska ah dartood qarashka ku baxa. Kaalmada qaaska ah waxa ay noqon kartaa mid loo baahan yahay, haddii dakhliga soo gala uu waqti dheer yahay mid hooseeya sida shaqo la'aan ama jiro darteed.
Sidoo kale shaqaaleynta, baxnaaninta iwm. Ka qeybgalidooda waxaan awoodnaa badanaa in lagu taageero lacagta kaalmada nolosha si ka fekerid ah:

Qeybta aasaasiga ah ee lacagta kaalmada nolosha oo la yereeyay

Haddii baahida kaalmada nolosha ay sababto in uu qofku sabab la'aan u diido shaqo ama howl kale oo uu siiyay xafiiska shaqada waxaa qeybta aasaasiga ah ee lacagta kaalmada qofka laga goynayaa 20%.Haddii uu dhowr mar shaqo diido waxaa ugu badnaan laga dhimayaa 40%.
Dhimida qeybta aasaasiga ah ee lacagta kaalmada nolosha ugu badnaanmarkiiba laba bilood ayaa go'aan laga gaari karaa. Go'aanka yarenta lacagta kaalmada marla la sameynaayo isla markaas shaqaalaha soo shalka waxa uu qorshe la sameynayaa macaaamiilka, sidee macaamiilka uu u awoodaa inuu mustaqbalka horumar shaqo uu u sameeyo iyo inuu qofka si madaxbanaani leh isu dabero ama uu u helo lacag noloshiisa uu ku deberan lahaa lah.

Sidee ayay dakhliga iyo hantidu u saameeyaan ogolaashaha lacagta kaalmada nolosha?

Daqli ahaan waxaa loo texgeliyaa inuu yahay dhamaan codsadaha iyo qoyskiisa lacagta soo gashaa marka canshuurta laga gooyo iyo hantidooda. Dhamaan dhaqaalaha iyo hantida aan u baahneyn si joogto ah in lagu badbaadiyo lacagta kaalmada nolosha waan tixgelineynaa oo (xisaabinta ayaan ku dareynaa.) tusaale guriga aad leedahay, qalabka iyo aabada shaqada ee aad leedahay waa muhiim,

303-492.pdf 28.12.2007

laakiin keydka waa waraaqaha qiimaha leh iyo baabuurka waxaan u xisaabineynaa inay yihiin hanti, taasoo uu macaamiilku uu ku maalgelin karo noloshiisa.

Ku taageerida shaqo qabashada qoyska lacagta soogasha laguma xisaabinaayo ugu yaraan 20% ugu badnaan 150 euro bishii. lacagta soogaleysa waxay ahaan kartaa mishaarka beec mushtarka, daryeelka xigtadaada kuu dhow.

Dib u soo celinta ama ka magida lacagta kaalmada nolosha

Lacagta kaalmada nolosha ama qeyb ka mid ah waa laga soo celinaayaa kaalma helaha

- haddii lacagta kaalmada nolosha loo ogolaado iyadoo dhan ama qeyb ka mid ah sida (lacagta howlgabka, lacagta shaqo la'aanta, masruuf, lacagta caawimada kirada, lacagta caawimada waxbarashada kaalmooyin kale iwm.)
- haddii kaalmo heluhu leeyahay dakhli, keyd, hanti ama uu xaq u leeyahay kaalmooyin badbaadinaaya noloshiisa kuwaasoo uusan heysan marka loo ogolaanayo kaalmadanolosha
- haddii kaalma heluhu uu si ula kac ah u dayaco masuuliyadiisa ah inuu daryeelo noloshiisa ama qoyskiisa biilkiisa.

Sidee loo codsadaa lacagta kaalmada nolosha?

Lacagta kaalmada nolosha waxaa laga codsadaa ama laga raadsadaa xarunta sooshalka ee ku taalla meesha aad deggan tahay. Adeega sooshalka- xafiiska sooshalka ee luqada iswidhishka waxa uu u adeegayaa macaamiisha ku hadasha luqada iswidhishka.
Lacagta kaalmada nolosha waxaa lagu codsadaa iyadoo qoraal ah.

Codsiga Lacagta kaalmada nolasha waxa lagu liifaaqo kuwan soo socda:

- aqoonsiga qofka (tagid si shaqsi ahaan ah)
- warqada mishaarka ee xubnaha qoyska ka tirsan ee shaqeeya ugu yaraan laba bilood ee ugu dambeeyay cadeynta mishaarka
- ganacsadaha waxaa laga rabaa cadeyn ku saabsan howshiisa iyo daqliga ka soo gala
- cadeemaha lacagta howlgabka iyo kaalmooyinka
- cadeemaha dakhliyada kale ee ku soo gala tusaale: kelada dakhliga kaa soo galala
- buuga bangiga ama warbixinta akoonka labadii bilood ee ugu danbeysay
- warqada canshuurta ee ugu danbeysay oo la xaqiijiyay
- rasiidka ijaarka, hishiiska ijaarka iyo warqada ay ku xusan yihiin inta qof ee guriga degan
- warqadaha kale ee suuurtogalka ah ee cadeynaya xaalada dhaqaale.

Haddii codsadaha xaaladiisa dhaqaale ay isbedesho xilliga la siinayo kaalmada nolosha,**waa inuu macaamiilka si dhaqso ah uu ugu soo gudbiyaa arimaha isbedelay xafiiska sooshalka.** Tusaale: dakhliga ama xubnaha qoyska Isbedelkooda, bilaabida shaqo ama waxbarasho waa in la soo wergeliyaa ama loo soo sheegaa xarunta sooshalka.

Siinta warbixin qalad ah shaqaalaha dowlada waa fal mudan ciqaab

Shaqaalaha sooshalka waxaa saaran waajib ah in ay xafidaan macluumaadka ay ka ogaadan macaamiishooda, waxayna xaq u leeyihiin inay helaan arrimaha quseeya macaamiilkooda ayagoo ka helaayo shaqaalaha kale ee dowlada. Wararka waa la diiwaan geliyaa, waxaana lagu keydiyaa diwaanka xafiiska ee kaydinta wararka macaamiisha ku saabsan (asiakastietojärjestelmä). Warbixin kooban oo ku saabsan diwaanka (rekisteriselosteote) waxaa lagu arki karaa cinwaankan www.hel2.fi/rekisteriseloste/.

Ka baaraan degida codsiga iyo bixinta kaalmada

Kabaaraan degida codsiga waxay qaadaneysaa 1 ilaa 2 isbuuc (todoba maalinshaqo). Ka baaraandegidu waxay ku soo deg-degtaa , in si taxadar leh loo soo buuxiyo foomka iyo inay la socodaan waxyaabaha kale ee loo baahan yahay in lagu liifaaqo foomka. Lacagta kaalmada nolosha go'aankeeda oo uu ku liifaaqan yahay codsiga waxaa bostada loogu soo diraa macaamisha. Lacagta kaalmada nolosha ee la ogolaaday waxaa lagu shubaa macaamiilka akoonkiisa. Lacagata kaalmada ee ijaarka lagu ogolaaday waxaa badanaa lagu shubaa ijaaraha akoonkiisa ama qofka guriga iska leh akoonkiisa.

Wax ka bedelida codsiga

Haddi codsadaha lacagta kaalmada uusan ku qanacsaneyn go'aanka laga gaaray, waxa uu awoodaa inuu codsado in wax laga bedelo go'aankaasisagoo ka codsanaayo gudiga adadkawaaweyn. Go'aanka lacagta kaalmada nolosha waxaa ku xusan sida loo codsado go'aan bedelida.

Tusaale ku saabsan sida loo xisaabiyo lacagta kaalmada nolosha:
Kaalmada nolosha waxaa codsanaya qoys aabuhu yahay shaqo la'aan qaatana lacagta kaalmada shaqo la'aanta, hooyaduna ay joogto guriga qaadatana lacagta hooyonimada. Ayna qoyska u joogaan ama ay ka tir sanyihiin qoyska ilmo 6 jir ah iyo mid 1 sano kayar. Qoyska dakhliga soo gala uu yahay kuwa aan kor ku soo xusnay waxaana intaa u dheer kaalmada ijaarka iyo lacagta caruurta.

Dakhliga ku soo gala	**Euro**	
Lacagta shaqo la'aanta	538,88	bishii
Lacagta hooyanimada	330,65	bishii
Lacagta kaalmada kirada	523,40	bishii
Lacagta caruurta	210,50	bishii
Isugeynta dakhliga	1603,43	bishii
Kharashka kaa baxa, qeybta aasaasiga ah		
Aabaha	339,24	bishii
Hooyada	339,24	bishii
Ilmaha 1aad	251,43	bishii
Ilmaha 2aad	231,48	bishii
Rasiidka ijaarka	680,00	bishii
Rasiitka biyaha	40,00	bishii
Biilka taleefanka	90,00	qarash kaabaxay looma xisaabiyo wuxuu ku jiraa qeybta aasaasiga
Biilka T-V	47,50	qarash kaabaxay looma xisaabiyo wuxuu ku jiraa qeybta aasaasiga
Dharka la soo iibsaday	45,00	e qarash kaabaxay looma xisaabiyo wuxuu ku jiraa qeybta aasaasiga
Tikitka baska ee la soo iibsaday	41,60	qarash kaabaxay looma xisaabiyo wuxuu ku jiraa qeybta aasaasiga
Isu geynta kharashka	2105,49	bishii
Isugeynta kharashka la tixgeliyay	**1881,39**	**bishii**
Isugeynta dakhliga	**- 1603,43**	**bishii**
Lacagta kaalmada nolosha	**277,96**	**bishii**

Go'aanka lacagta kaalmada nolosha:
Waxaa loo ogolaaday lacagta kaalmada nolosha oo hal bil ah dhana 277,96 euro. Waxaa kale oo loo ogolaaday inta uu go'aankan joro biilka korontada ee bishan dhacaya ee macquulka ah iyo kharashka daryeelka caafimaadka ee goobaha caafimaadka ee dowlada qeybta qofka ku soo aada iyo daawooyinka uu dhakhtarku qoro daryeelka jirada.

303-492.pdf 28.12.2007